



Wasaaradda Cadaaladda ee U.S.
Federal Bureau of Investigation

TUSMADA KA-FALCELINTA HANDADAAD iyo CABSIIN



HANDADAAD SHAQSI WAJI-KA-WAJI AH

HANDADAAD QOFKA jirkiisa waa marka aad ku suguntahay halis dhow sababta oo ah waxaad aad ugu dhowdahay qofka sameynaya handadaadda. Waxaa kula gudboon seddex talo:

- 1. Carar:** Go'aanso wadiiqada aad ku baxsan lahayd. Iska tuur agabka aad sidato ee ku culeeysin kara. Hadeey suurtoowdo, caawi dadka kale in ay baxsadaan. Wac 911.
- 2. Dhuumo:** Ka dhuumo beegisga handadaadda. Albaabada xir ama wax ku gudub iridaha. Taleefonkaada codka ka xir (xitaa gariirka) aamusnoow inta khatarta ay ka dhamaaneeyso.
- 3. Dagaalan:** Dagaalku waa inuu noqdaa talaabada ugu dambeeya ee aad qaado, waana marka naftaada ay halis weeyn gasho oo kaliya. Isku dey in aad itaal tirto khatarta. U isticmaal lixaadkaaga sida ugu tabarta weeyn ee suurtagalka ah.

Handadaad Shaqsi Ah oo afka ah- Waa mid aan lahayn beegsi khatar deg-deg ah, ama loogu tala galay in mar dambe la fuliyo

- Qor ama duub handadaadda sida laguugu soo gudbiyey oo sax ah.
- U diwaangeli sida ugu faah-faahsan ee suurtagalka ah qofka ku handadey: magaca, muuqalka, midabka oogada, lab/dhedig, dhererka, culeeyska, midabka indhaha iyo timaha, codka, lebiska, ama astaan kale .
- U sheeg saraakiisha sharci fulinta arrinka handadadda



HANDADAAD TALEEFONKA AH

HANDADAAD TALEEFON waa handaad lagu sameeyey taleefonka. Waa in aad isku deydaa in aad ka hesho xogta ugu badan qofka ku soo wacaya iyo handadaadiisa wixii suurtagal ah, haddeyna handadaadda ahayn mid dhow ama halis deg-deg ah u leh adiga ama dadka kale.

- Is deji hana dhigin taleefonka.
- U daa hadalka qofka ku soo wacaya ilaa intii uu doono iskuna dey in aad ka hesho xog in handadaadu ay tahay mid gaar ah, suuragal ah, lehna halis deg-deg ah oo ku beegan adiga ama dadka kale.
- Haddeey suurtoowdo, u baaq dadka kale ee kuu dhow in ay kula dhegeeystaan, ogeeysiina saraakiisha sharci fulinta.
- Ka qor wixii xog ah ee kaaga muuqda shaashadda taleefonka kuu soo bandhigo elektroonik ahaan
- U qor handadadda sida laguugu soo gudbiyey oo sax ah.
- Duub wicitaanka hadeey ku suurtoowdo
- La wadaag xogta oo faah-faahsan saraakiisha sharci fulinta



HANDADAAD FARIIN ELEKTROONIK AH

HANDADAAD FARIIN ELEKTRONIC AH waa mid ku timid fariin toos ah, email, ama baraha bulshada. Waxaa ku jiri kara handadaad ceeb faafin ah, baad ama cawaaqib xuma ba'an haddii qofka la beegsanayo uusan amarka qaadan

- Ha furin fariin elektroonik ah, ama lifaaq aadan garaneeyn cidda soo dirtey.
- Ha kula xiriirin baraha bulshada qof aadan garaneeynin ama aan ogolaansho kaa helin.
- Hubso in amniga aaladdaada uu yahay heerka ugu sareeya..

Haddii aad heshid handadaad elektroonik ah:

- Ha tir-tirin fariinta. Waxaa laga yaabaa in Baarintaanka Cilmiyeeysan uu soo saaro xog muhim ah.
- Ku dhaaf fariinta oo furan kombiyutarka.
- Dhakhsiba gaarsii saraakiisha sharci fulinta.
- Daabac, sawir, ama nuqul ka samee fariinta, moowduuca, taariikhda, iyo wakhtiga.
- Kaydi cadeeymaha elektrooniga ah.



WEERAR INTERNETKA AH

WEERAR INTERNETKA wuxuu wax u dhimi karaa aaladdaada elektroonikada ah, wuxuuna daaha ka qaadi karaa xog shakhsiyadeed

- Isticmaal baasword xoog leh, hana u isticmaalin isla furihii shabakado fara badan.
- Waxaad gelisaa anti-virus and anti-malware si uu mar walba isu cusbooneeysiyo.
- Adeegso noocyada cusub ee hababka iyo software markii ay soo baxaan.
- Adeegso xaqiijinta labada heer ah.
- Si joogto ah ugu samee daatada kayd (Backup).

Haddii aad tuhun santahay in aad tahay dhibane weerar xagga internetka ah:

- Ha tir-tirin, waxbana ha ka beddelin habka kombiyutarkaaga
- Dhakhsiba la xiriir hay'adahaada maaliyadeed si ay u ilaaliyaan akoontyadaada in aanu xadin qof aqoonsigaaga wata
- Beddel baasword-ka ilaalina akonkaaga in hawlo shaki leh ka socdaan.

Haddii aad ku sugantahay khatar deg-deg ah, wac 911. Haddii aad la kulanto handadaad, fadlan la xiriir xafiiska FBI ee deegaankaaga (liiska waxaad ka heleeysaa www.fbi.gov) ama wac 1-800-CALLFBI (or 1-800-225-5324) or via www.fbi.gov/tips. Waxaa kale aad ugu soo gudbin kartaa FBI taleefon ahaan ama online adigo magacदान.



Wasaaradda Cadaaladda ee U.S.
Federal Bureau of Investigation

TUSMADA KA-FALCELINTA HANDADAAD iyo CABSIIIN



Yaan la xiriiraa haddii ay ila soo dersaan handadaad ama baqdin: Booliska ama FBI?

- Haddii adiga ama dad kale aad la kulantaan halis-khatar deg-deg ah, wac booliska adoo garaacaya 911.
- Haddii aad la kulanto cagajuglayn la xiriirta fal-dambi ee federal ah, la soo xiriir xafiiska deegaankada ee FBI (aad ka heleeytid www.fbi.gov) adiga oo wacaya 1-800-CALLFBI (ama 1-800-225-5324) ama kan www.fbi.gov/tips Tusaalooyinka halista waxaa ka mid ah mid kaga timaada wakiil dawlad shisheeye, dambiyada abaabulan, ama qof mas'uul dawladda ah. Warxbintaada waxeey noqon kartaa mid sumadlaawe ah.
- Dhacdooyinka oo dhan ma ay wada mudna baaritaanka FBI. Haddii aad tahay dhibane dhacdo aan waafaqsanayn heerka loo aqoonsanyahay fal-dambiyeed federal ah, waxaad u sheegi kartaa waaxda booliska deegaankada. Xukunnada deegaanka iyo walaayadda waxeey leeyihiin mudnaan kala gedisan marka ay timaado baaritaan tuhun ee falalka dambi



Maxaan ka filan karaa FBI haddii wareeysi ila yeelato?

- Wakiil FBI ayaa kugula kulmi kara xafiiska FBI ama meel kale.
- FBI waxeey ku weydiineysaa in aad la wadaagto wixii xog ah oo idil oo la xiriira qofka ku maagey iyo faahfaahin handadaadda lagu geystey.
- FBI waxeey ku weediinaysaa sida laguula soo xiriiri karo haddii mar kale loo baahdo.
- FBI waxeey isku dayeysaa in ay xafido aqoonsigaaga iyo wixii sir ku ah.
- Haddeey haboonato, Khabiir FBI-da ah ee arrimaha Dhibanaha ayaa joogi kara marka wareeysiga la qaadayo si uu xog iyo taageeraba u bixiyo, ama dib dambe kula soo xiriiro.



Waa maxay go'aan-beegga FBI in ay baarto cabasho iyo/ama in ay ku furto baaritaan?

- FBI waxey awooddaa in ay baarto handadaadda ku xadgudbeysa sharciga Federaalka ee Mareykanka u keeni karta waxyeelo iyo khatar qofka lala beegsado
- Awoodda dowladda Mareykanka ay qofka ku oogeeyso dambi la xiriira handadaad waxey ku xirantahay dhawr arrimood sida: tayada cadeynta, karitaanka in la hayo dadkii falka geystey, aqoonsiga in shirqool uu jiro, iyo/ama awooda in la xiro shakhsiyaadka xadgudubka sameeyey.



Maxaan filan karaa haddii FBI ay biloowdo baaritaan?

- Haddii FBI ay rumeysantahay in dambi heer federal ah la galay, hal ama in ka badan ee saraakiisha FBI-da ayaa qaaidoona baritaan. Waxaa ka qayb ah baaritaanka, in saraakiisha gaarka ah ay ururiyaan cadeeymo, ay ku jiri karaan wareeysi lagu la yeesho adiga iyo dhibbaneyaasha kale.
- Waxaa kale oo laga yaabaa in lagu weydiyo in aad ku qeexo waxa ku qabsaday xeer-beegti weeyn oo federal ah hortooda.
- Baaritaan mug leh ayaa la dhameeystirayaa. Dhameeystirka baarintaanka wuxuu qaadan karaa wakhti dheer, wixii horumar ah ee kiiska la xiriira si joogta ah laguuguma soo gudbinayo. Dadaal walba waa la sameeynayaa si laguugu sheego dhacdooyinka waaweyn ee baaritaanka sida xiritaan, ama eedeeyn. FBI-da waxaa ka go'an, markii ay suurtoowdo, in ay kuu sheegto wixii xog ah ka hor inta aan loo tebinin dadweeynaha kale. Si kastaba ha ahaatee, FBI-da waa in ay mar walba ka taxadartaa in ayna sii deeynin xog xaasasi ah oo dhaawici kara baaritaanka ama khatar ku kordin kara sharci fulinta.
- Khabiir FBI-da ah ee arrimaha Dhibanaha ayaa la heli karaa oo siinaya dhibanayaasha taageero, xog, iyo gudbin adeegyada ka jira deegaanka ee loo baahan karo.

Xitaa haddii sheegitaankaga sida lagu handadey ama lagu cabsiiyey ayna keenin in la baaro, waxeey u badan tahay in ay caawinto dhibanayaal kale raadraaca FBI ay ku aruuriso handadaada iyo aqoonsigeda.